



## Qaanuunka Badqabka ee Dhisida & Duminta Dhismayaasha - Caddaynta Qorshaha Badqabka Goobta (SOOMAALI)

Oggolaansho-haystaha hoos ku saxiixan ("Ruqsad-haystaha") waxa uu caddeynayaa waxyabaha soo socda isagoo og ciqaabaha iyo ganaaxyada ka dhalan kara been-sheegida:

Ruqsad-haystaha waxa uu halkan ku qirayaa walaacyada ay Magaaladu ka qabto badqabka goobaha shaqada, iyo in Magaaladu ay hirgelisay sharchiyo cusub si loo dhimo shilalka ka dhaca goobaha shaqada iyo agagaarkooda. Ruqsad-haystaha waxa uu ayiddayaa in uu akhriyay oo fahmay Xeerka Magaalada Boston, Qaunuunada, Cutubka 16-65, Qaunuunada Maamulaya Dhisida iyo Duminta Dhismayaasha ee Magaalada Boston ("Qaanuunka") iyo inuu u fulin doono hawlahiisa si adag oo waafaqsan dhammaan waajibaadyada, tilmaamaha, iyo shuruudaha lagu soo rogay Qaanuunka la sheegay.

Ruqsad-haystuhu wuu fahamsan yahay in ay tahay mas'uuliyad saaran Shati-haystaha inuu horumariyo, ilaaliyo, oo raaco Qorshaha Badqabka ee mashruuc walba u gaarka ah ee qoran oo qeexaya sida uu u fulin doonto waajibaadka saaran.

Ruqsad-haystaha ayaa qirayaa in uusan jirin wax sharci ah oo ka mid ah Qaanuunka oo uga baahan Waaxda Adeegyada Kormeerka, ama uga baahan hay'ad kasta oo kale oo ka jirta Magaalada, inay u qaataan ama u dhaqangeliyaan wax kasta oo ku jira qaunuunka caafimaadka iyo badqabka ee Maamulka Badqabka Shaqada iyo Caafimaadka ("OSHA") ee maamula Badqabka dadka ka shaqeeyaa hawl gallada dhismaha ama duminta iyo in u hoggaansanaanta sharchiyada OSHA ay masuuliyad gooni ah ka saaran tahay Ruqsad-haystaha.

Ruqsad-haystaha ayaa caddaynaya inuu sameeyay oo uu hirgeliyay Qorshaha Badqabka Goobta ee loogu talagalay goobta shaqo iyadoo la raacayo ruqsadda u hoggaansan, iyo inuu buuxin doono, dhammaan waajibaadyada sharchiyeed, tilmaamaha, iyo shuruudaha uu soo rogay Qaanuunka. Gaar ahaan, Ruqsad-haystaha ayaa caddaymaya in Qorshaha Badqabka ee loogu talagalay goobtan uu qeexayo dhowritaanada qorshaysan ee khataraha ku iman kara dadka ku sugar goobta mashruuca, dadweynaha, iyo hantida taala goobta hawl galada dhismida iyo duminta dhismayaasha iyo inuu buuxinayo shuruudaha lagu dabaqi karo ee ay qeexday Waaxda, sida lagu qeexay Maqaalka Guddoomiyaha CB2023-04. Ruqsad-haystaha ayaa sidoo kale caddaymaya in Qandaraasle-hoosaad kasta, Qandaraas-hoosaadlaha, iyo dhinacyada kale ee goobta shaqada ku qaban doona Mashruuca ay sidoo kale u hoggaansami doonaan oo buuxin doonaan shuruudahan. Ruqsad-haystaha ayaa qiraya inay mas'uuliyad gaarka ah ka saaran tahay inuu hubiyo in qandaraasle-hoosaadyada ay u hoggaansamaan Qaanuunka.

Ruqsad-haystaha ayaa caddaynaya inuu u hoggaansami doono dhammaan shuruudaha hawl gelinta ee lagu dabaqi karo Qaanuunka iyo habraacyada maamuleed ee la xiriira Warbixinada Kooban ee Guddoomiyaha, oo ay ku jiraan Hanuuninta Badqabka Goobta, Casriyeynada Sannadlaha ah, Shirarka Badqabka ee Gelinka Shaqo Kahor, ilaalinta diiwaannada muhiimka ah iyo qorista diiwaanada, bixinta ogeysiisyada loo baahan yahay, iyo bixinta dukumentiyada loo baahan yahay, si waafaqsan Qaanuunka, marka ay codsato Waaxda Adeegyada Kormeerka iyo/ama Kormeerayaasheeda iyo Saraakiisha Dhismaha.

Ruqsad-haystaha ayaa qiraya oo waafaqaya in u hoggaansamid la'aanta mid ka mid ah shuruudaha kor ku xusan, oo ay ku jiraan ku guuldareysiga in loo hoggaansamo Qorshaha Badqabka Goobta ee gaarka ah, ay keeni karto hakinta ama joojinta shaqada socota ama kala noqoshada ruqsadda Magaaladu bixiso ee loogu talagalay shaqadan; iyadoo ku xiran, si kastaba ha noqotee Magaaladu waxay xaq u leedahay inay u oggolaato Ruqsad-haystaha fursad uu si dhakhso ah ugu saxo ama wax uga qabto xadgudubyada kahor inta aysan Magaaladu soo saarin hakinta ama joojinta shaqada socota ama kala noqoshada ruqsadda ay bixiso Magaalada ee loogu talagalay shaqadan.

---

Magaca Shati-haystaha

Saxiixa

Taariikhda

---

Cinwaanka Mashruuca